# Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale

***Financial Assistance Policy—Somali***

*Siyaasadda RC-05*

**UJEEDADA:** In lagu qeexo Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee isbitaalada iyo rugaha caafimaadka ee HealthPartners ("HealthPartners") (oo loogu yeero "FAP" ama "Siyaasadda"), taasoo loo heli karo bukaanada aan lahayn caymiska ama leh caymiska aan ku filnayn iyadoo lagu salaynayo awoodda bukaanka ee uu ku bixinayo gurmadka xaaladaha degdegga ah iyo daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah.

**QEEXITAANADA:** Ma Khusayso

**SIYAASADDA:** HealthPartners waxaa ka go'an inay daryeel caafimaad oo tayo leh siiyaan bukaanadeena, oo ay ku jiraan kuwa u baahan kaalmada dhaqaale. Siyaasadda waxaa loo heli karaa in lagu bixiyo caawimo gaar ah; looguma talagalin in lagu bixiyo daryeel muddo dheer ah ama daryeel qiimo jaban. Codsiga kaalmada dhaqaale wuxuu ansax yahay muddo 12 bilood ah ilaa codsi kale laga gudbiyo. Codsiga kaalmada dhaqaale wuxuu yeelan doonaa xaddidnaanta 2-di sano ee la soo dhaafay oo loogu talagalay adeegyada uqalma ee la bixiyay. Siyaasadeena iyo Lifaaqeeda waxay qeexayaan shuruudaha uqalmitaanka, sida aan u xisaabino qiimo dhimisyada, sida loo codsado kaalmada dhaqaale, bixiyeyaasha daryeelka ka bixinaya isbitaaladeena, iyo siyaasadeena daryeelka caafimaadka ee degdegga ah.

Bukaanadu waxay heli karaan nuqullo bilaash ah oo ah Siyaasadan, Lifaaqyada, iyo foomka codsiga kaalmada dhaqaale oo ay si shakhsi ah uga heli karaan dhammaan goobaha diiwaangelinta bukaanada. Wixi xog dheeraad ah ama su'aala ah oo ku saabsan nidaamka codsiga, ama codsiga nuqullada in lagu helo boosto, bukaanadu waxay la xiriiri karaan mid ka mid ah Waaxyadeena Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka. Xogta buuxda ee meelaha lagala xiriiro mid kasta oo ka mid ah Waaxyadeena Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka waxaa laga helayaa Lifaaqa 1. Nuqallada bilaashka ah ee Siyaasaddan, foomka codsiga, iyo tarjumaadaha waxaa laga heli karaa barta www.healthpartners.com/fa

**SHURUUDAHA UQALMITAANKA**

HealthPartners waxay dejisay shuruudaha uqalmitaanka ee soo socda si bukaanadu ay u helaan kaalmo dhaqaale:

- Bukaanka iyo xubnaha qoyska waxaa la waydiin karaa inay keenaan caddaynta in loo diiday ama loo diidi doono kababka dawladda, sida Medicaid. Warqada(ha) diidmada kababka oo ka socota dawladda ayaa laga yaabaa in la codsado.[1]
- Bukaanku waa inuu si buuxdo u dhammaystaa barnaamij kasta oo kaalmo dawladeed ah iyo dheefo kasta oo la heli karo oo ah caymiska caafimaadka.[2]
- Bukaanku waa inuu buuxiyaa Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee HealthPartners uuna bixiyaa dhammaan dukumiintiyada laga codsado.
- Uqalmitaanka bukaanka ee daryeelka bilaashka ah ama qiimaha jaban wuxuu ku salaysnaan doonaa dakhliga soo gala qoyska, tirada qoyska, iyo hantida.[3]
    - Bukaanadu waa inay keenaan dukumiintiyada hantida qoyska sida lacagta caddaanka ah iyo hantida kale ee sida sahlan lacag caddaan ah loogu rogi karo si codsigooda loo eego.
    - Hantida sida sahlan lacagta caddaanka ah loogu rogi karo waxaa ka mid ah lacagta kaashka ah iyo hantida sida sahlan loogu rogi karo lacag caddaan ah, sida koontooyinka keydsashada iyo koontooyinka maalinlaha loo isticmaalo, saamiyada, curaarta, shahaadooyinka lacag dhigashada, gunnooyinka nolosha iyo koontooyinka suuqa lacagta. Lacagaha hawlgabka (sida 401K, koontooyinka IRA iyo gunnooyinka dib loo dhigtay) waa laga reebaa hantida sida sahlan lacagta caddaanka ah loogu rogi karo. Dukumiintiga hantida sida sahlan lacagta caddaanka ah loogu rogi karo ayaa laga yaabaa in la codsado.
    - Hanti kasta oo si sahlan lacag caddaan ah loogu rogi karo oo ka badan $20,000 ayaa lagu daraa xisaabinta dakhliga.
- HealthPartners waxay kaalmo buuxdo ama qayb ah siisaa dhammaan bukaanada aan caymiska lahayn iyo kuwa leh caymiska aan ku filnayn kuwaasoo dakhliga qoyska uu ka yar yahay ama la'eg yahay 400% ee Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL). HealthPartners waxay qorshayaal lacag-bixineed siisaa dhammaan bukaanada aan caymiska lahayn iyo kuwa leh caymiska aan ku filnayn kuwaasoo dakhliga qoyska uu yahay ama ka badan yahay 401% ee heerka FPL.

---

[1] Bukaanada daryeelka ka helaya Amery Regional Medical Center iyo Hutchinson Health **loogama** baahna inay codsadaan ama loo diiday kababka hoos yimaada barnaamijyada kaalmada dawladda ka hor inta aanay uqalmin kaalmada dhaqaale.

[2] Bukaanada daryeelka ka helaya Amery Regional Medical Center iyo Hutchinson Health **loogama** baahna inay codsadaan ama loo diiday kababka hoos yimaada barnaamijyada kaalmada dawladda ka hor inta aanay uqalmin kaalmada dhaqaale.

[3] Xaqiijinta hantida iyo dib-u-eegista **laguma** dabaqo bukaanada daryeelka ka helaya Amery Regional Medical Center iyo Hutchinson Health.

## SIDA LOO CODSADO KAALMADA DHAQAALE

Si aad u hesho xog ku saabsan sida loo codsado kaalmada dhaqaale, fadlan ka eeg Lifaaqa 1.

## XISAABINTA KAALMADA DHAQAALE

HealthPartners waxay u xisaabisaa heerka kaalmada dhaqaale ee bukaanka sidan soo socota:

**Xisaabinta Qiimo Dhimista Kaalmada Dhaqaale** ee HealthPartners:

1. Tirada qoyska bukaanka iyo dakhliga ayaa lagu ururiyaa codsiga kaalmada dhaqaale iyo xogta kale ee la bixiyo.
2. Haraaga masuuliyadda bukaanka ee ugu haray koontada isbitaalka ayaa laga ururiyaa nidaamkeena diiwaanka caafimaadka ee elektaroonigga ah.
3. Anagoo isticmaalayna tirada qoyska iyo dakhliga soo gala, waxaan xisaabinaa booska bukaanka uu uga jiro Heerka Saboolnimada Federaalka.
4. Haddii bukaanku joogo ama ka hooseeyo 200% ee Heerka Saboolnimada Federaalka, wuxuu heli doonaa qiimo dhimis buuxda (100%).
5. Bukaanada uu dakhliga guud iyo tirada qoyska ay gaynayaan wax ka badan 200% ee heerka FPL waxay heli doonaan kaalmo dhaqaale oo qayb ah sida soo socota:

| Dhibcaha FPL | Qiimo Dhimista |
|---|---|
| 200% ama ka yar | 100% qiimo dhimis ah |
| 201-300% | 75% qiimo dhimis ah |
| 301-400% | 50% qiimo dhimis ah |

**Xisaabinta Qiimo Dhimista Qadarada Guud Ahaan La Dallaco ("AGB"):**

"Qadarada Guud Ahaan La Dallaco" (AGB) waa erey loola jeedo qadarada caadi ahaan lagu dallaco shakhsiyaadka leh caymis daboolaya xaaladaha degdegga ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah. Xisaabinta AGB ee isbitaal kasta oo ka mid ah HealthPartners waxaa laga heli karaa Lifaaqa 2. Kadib marka la go'aamiyo uqalmitaanka bukaanka ee kaalmada dhaqaale ee hoos timaada siyaasadan, bukaanka uqalma kaalmada dhaqaale laguma dallici doono wax ka badan qadarka AGB ee bukaanada ay ku dallacdo goobta bixinaysa daryeelka HealthPartners ee xaaladaha degdegga ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah.

**Uqalmitaanka La iska Qaatay:**

HealthPartners waxay si iska qaadasho ah u go'aamin kartaa in bukaan uu uqalmo kaalmo dhaqaale iyadoo lagu salaynayo go'aamin hore oo uqalmitaan ama buuxinta duruufaha qaar ee kaalmada dhaqaale, kuwaasoo ay ku jiraan:

- Hoy' la'aanta;
- Adeegyada aan caafimaad ahaan looga maarmin kuwaasoo uusan daboolin ama lagu bixin barnaamijka Medicaid ama deeqda federaalka ee la siiyo qaataha uqalma;
- Uqalmitaanka iyo taariikhda dhaqangalka ee Medicaid kadib taariikhaha adeegga; ama
- Geerida.

Adeegyada laga reebay waxaa ka mid ah adeegyada doorashada ah (adeegyada qurxinta ama kuwa kale ee aan caafimaad ahaan loogu baahnayn), iyo sidoo kale baaqiyada ay tahay inuu bixiyo caymiska, sida Medicare, Medicaid, caymiska gawaarida, magdhowga shaqaalaha ama caymiska masuuliyadda. HealthPartners waxay sidoo kale adeegsan karaan qiyaasta bukaanka ee qolo saddexaad, oo bixiye uu bixiyay oo ku aadan tirada qoyska iyo dakhliga si ay ugu siiso heer FPL ah oo ay ugu isticmaasho qiimo dhimista shaxda kore. HealthPartners waxay sidoo kale dooran kartaa inay bixiso uqalmitaan ay iskaga qaadatay xaalado bukaan oo naadir ah ama aan caadi ahayn oo aan si gaar ah loogu dejin FAP. Gaarista go'aamada uqalmitaanka la iska qaatay, haddii qiimo dhimista la iska qaatay aysan ahayn qiimo dhimista ugu badan ee la heli karo, HealthPartners waxay ogaysiin doontaa bukaanada waxayna siin doontaa qadar wakhti oo macquul ah si bukaanadu ay si shakhsi ah ugu codsadaan kaalmo dhaqaale oo dheeraad ah.

## LIISKA BIXIYEYAASHA GUDAHA ISBITAALKA

Isbitaalada HealthPartners waxaa looga baahan yahay inay liisgareeyaan dhammaan bixiyeyaasha, aan ka ahayn isbitaalka laftiisa, ee gurmadka degdegga ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah ka bixinaya gudaha isbitaalka iyo inay cayimaan bixiyeyaasha ay daboolayso Siyaasadan iyo kuwa aanay daboolaynin. Liiskan bixiyaha waxaa lagu hayaa dukumiinti gaar ah. Bukaanadu waxay codsan karaan nuqul waraaq ah iyagoo la xiriiraya goobta Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka ee ay ka heleen daryeelka ama iyagoo gujinaya halkan: www.healthpartners.com/fa. Xogta buuxda ee meelaha lagala xiriiro mid kasta oo ka mid ah waaxyadeena Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka waxaa laga helayaa Lifaaqa 1.

## SIYAASADDA DARYEELKA CAAFIMAADKA EE DEGDEGGA AH

HealthPartners waxay bukaanada siisaa daryeel, si takoor la’aan ah, oo loogu talagalay xaaladaha caafimaad ee degdegga ah iyadoo aan loo eegin awoodda ay u leeyihiin inay iska bixiyaan ama uqalmitaanka kaalmada dhaqaale. HealthPartners waxaa mamnuuc ka ah tallaabo(oyin) kasta oo ka hor istaagaya bukaanada inay raadsadaan daryeel caafimaad oo degdeg ah. Tusaalooyinka dhaqanka mamnuuca ah waxaa ka mid ah: qof shaqaale ama wakiil ka ah isbitaalka HealthPartners oo bukaanada waaxda xaaladaha degdegga ah ka dalbanaya inay lacag bixiyaan ka hor inta aanay helin daawaynta daryeelka caafimaadka ee degdegga ah ama oggolaanshaha hawlaha ururinta deynta ee faragelinaya bixinta daryeelka caafimaadka ee degdegga ah. Isbitaalada HealthPartners waxay u hoggaansamaan dhammaan shuruudaha la dabaqi karo ee Xeerka Daawaynta Caafimaadka ee Degdegga ah iyo Shaqada (EMTALA), oo ay ku jiraan bixinta baaritaanada caafimaadka, daawaynta xasilinta ah, iyo u gudbinta ama u wareejinta bukaanka ee xarun kale marki ay habboon tahay. Isbitaalada HealthPartners waxay u bixiyaan dhammaan adeegyada xaaladaha degdegga ah si waafaqsan shuruudaha CMS ee kaqaybgalka.

## SIYAASADDA BIIL QAADISTA IYO URURINTA EE GAARKA AH

Tallaabooyinka ay HealthPartners qaadi karto marka lacag la bixin waayo waxay ku qeexan yihiin Siyaasadda Biil Qaadista iyo Ururinta ee gaarka ah. Nuqul bilaash ah oo ah Siyaasadda Biil Qaadista iyo Ururinta ee isbitaalada iyo rugaha caafimaadka ee HealthPartners waxaa laga daalacan karaa lagalana soo dagi karaa webseedkeena www.healthpartners.com/fa

# Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale Lifaaqa 1

*Siyaasadda RC-05*

**UJEEDADA:** Lifaaqani wuxuu qeexayaa sida loo codsado kaalmada dhaqaale.

**QEEXITAANADA:** Ma Khusayso

**SIYAASADDA: SIDA LOO CODSADO KAALMADA DHAQAALE**

1. Bukaanada HealthPartners waxay codsigooda kaalmada dhaqaale ka buuxin karaan iyagoo galaya koontadooda onlaynka ah, iyagoo foomka ka daabacanaya webseedkeena www.healthpartners.com/fa ama nuqul ka helaya iyagoo wacaya ama booqanaya Waaxda Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka ee goobta ay ka helaan daryeelka. Goobaha Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka waxay wicitaanada taleefanka u furan yihiin Isniinta–Jimcaha saacadda 8:00 a.m.–4:30 p.m.

**Amery Hospital and Clinic**
Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka
265 Griffin Street East
Amery, WI 54001
715-268-8000

**HealthPartners Clinic - Stillwater**
Xafiiska Shaqada (Talaado-Jimco)
1500 Curve Crest Blvd
Stillwater, MN 55082
651-439-6528

**Rugaha Kooxda Caafimaadka ee HealthPartners**
651-265-1999

**Hudson Hospital and Clinic**
Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka
405 Stageline Road
Hudson, WI 54016
715-531-6200

**Hutchinson Health**
Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka
1095 MN-15
Hutchinson, MN 55350
320-484-4493

**Lakeview Homecare & Hospice**
651-430-8709

**Lakeview Hospital**
Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka
927 West Churchill Street
Stillwater, MN 55082
651-430-4533

**Park Nicollet Health Services**
**(oo uu ku jiro Methodist Hospital)**
Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka
3800 Park Nicollet Blvd
St. Louis Park, MN 55416
952-993-7672

**Olivia Hospital and Clinic**
Xafiiska Shaqada
100 Healthy Way
Olivia, MN 56277
320-523-8300

**Regions Hospital**
Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka
Mail Stop 11102S
640 Jackson St
Saint Paul, MN 55101
651-254-4791

**Xarumaha iyo Rugaha TRIA Orthopaedic**
952-993-5463

**Westfields Hospital and Clinic**
Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka
535 Hospital Road
New Richmond, WI 54017
715-243-2600

2. Bukaanadu waa inay dhammeystiraan Codsiga Kaalmada Dhaqaale ayna bixiyaan xaqiijinta(xaqiijimaha) ku habboon ee dakhliga iyo hantida oo ay ku bixiyaan mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

   a. Boosto Ahaan:
      Sanduuqa Boostada 773217
      Detroit, MI 48277-3217

   b. Iimayl Ahaan: hpfinancialassistance@healthpartners.com

   c. Fakis Ahaan: Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka, 952-993-7672

   d. Onlaynka: Adigoo galaya koontada onlaynka ee bukaanka

3. Xaqiijinta(xaqiijimaha) habboon ee dakhliga qoyska waxaa ka mid ah: koobiga canshuur celinti 1040 ee ugu danbaysay ee Federaalka, warqadda dheefta ee Sooshal Sakuuratiga, dheefaha shaqo la'aanta ama naafada, iyo dukumiintiga heshiiska masruufka lammaanaha. Haddii bukaan uusan xarayn canshuuraha ama dakhliga bukaanka uu yaraaday tan iyo canshuur xaraynti u dambaysay, bukaanku waxaa kale oo uu bixin karaa rasiidhadi mushaar bixinta ee 60-ki maalmood ee ugu dambeeyay.

4. Bukaanada waxay Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka kala xiriiri karaan lambarka ugu qoran xarunta HealthPartners ee ay ka heleen daryeelka ee #1 ee kore wixi su'aala ah ee ku saabsan codsiga ama qabanqaabada/ballan ka qabsashada La-taliye Dhaqaale.

5. Shaqaale loo qoondeeyay Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka ayaa diyaar u ah inay bukaanada taleefanka ama shakhsi ahaan uga caawiyaan buuxinta codsiga.

6. Kaalmo shakhsi ahaaneed ayaa sidoo kale lagu heli karaa codsashada barnaamijyada dawladda sida Kaalmada Caafimaadka. Bukaanadu waxay sidoo kale la xiriiri karaan waaxda Adeegyada Aadanaha ee degmada ay deggan yihiin ama dadka deggan Minnesota waxay MNsure ka wici karaan 1-855-366-7873 halka dadka deggan Wisconsin ay Kaalmada Caafimaadka ee Wisconsin kala xiriiri karaan 608-266-1865. Bukaanada waxay Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka kala xiriiri karaan lambarka ugu qoran xarunta HealthPartners ee ay ka heleen daryeelka ee #1 ee kore wixi su'aala ah ee ku saabsan codsiga barnaamijyada dawladda ama inay helaan goob laga heli karo wakiil si shakhsi ah ula kulma.

**UJEEDADA:** Lifaaqani wuxuu qeexayaa xisaabinta AGB ee isbitaal kasta oo ka mid ah HealthPartners.

**QEEXITAANADA:** Ma Khusayso

**SIYAASADDA: XISAABINTA QADARADA GUUD AHAAN LA DALLACO ("AGB")**

"Qadarada Guud Ahaan La Dallaco" (AGB) waa erey loola jeedo qadarada caadi ahaan lagu dallaco shakhsiyaadka leh caymis daboolaya xaaladaha degdegga ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah. Xisaabinta AGB ee isbitaal kasta oo ka mid ah HealthPartners waxaa laga heli karaa jaantuuska hoose. Kadib marka la go'aamiyo uqalmitaanka bukaanka ee kaalmada dhaqaale ee hoos timaada siyaasadan, bukaanka uqalma kaalmada dhaqaale laguma dallici doono wax ka badan qadarka AGB ee bukaanada ay ku dallacdo goobta bixinaysa daryeelka HealthPartners ee xaaladaha degdegga ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah.

Boqolkiiba qadarka AGB waxaa loo xisaabiyaa isu qaybinta wadarta dhammaan sheegashooyinka isbitaalka HealthPartners ama sheegashooyinka goobta bukaan socodka ee isbitaalka ee daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah ee ay oggol yihiin caymis bixiyeyaasha caafimaadka inta lagu jiro muddo 12-bilood ah oo hore oo loo qaybiyay wadarta kharashaadka guud ee la xiriira sheegashooyinkaas. Xisaabintani, oo sidoo kale la yiraahdo "Habka Dib Eegista," waxaa sanad walba xisaabiya HealthPartners.

| | |
|---|---|
| Amery Hospital and Clinic | 47.86% |
| Hudson Hospital and Clinic | 54.89% |
| Hutchinson Health | 53.00% |
| Lakeview Hospital | 61.32% |
| Methodist Hospital | 68.21% |
| Olivia Hospital | 36.30% |
| Regions Hospital | 65.63% |
| Westfields Hospital | 47.40% |